I-ILAALI

Macluumaadka ammaanka dabka ee daganeyaasha guryaha dadweynaha

# Maxaa la sameeyaa haddii dab dhaco?

Buug-yarahan waxaa ku jira macluumaad muhiim ah ee ammaanka dabka looguna talagalay dadka ku nool guryaha dhismeyaasha dhaadheer.

Waxay sheegaysaa waxa la sameeyo haddii haddii dab ka dhaco yunidkaaga ama dhismahaaga.

Fadlan si taxadar leh u aqri macluumaadkan.

Ku hayso buug-yarahan meel ay fududaha in lagala soo baxo.

Haddii aad doonayso macluumaad dheeraad ah fadlan wac am aka eeg xafiiska gurisiinta degaankaaga.



VICTORIA State Government

# Alaamyada qiiqa iyo sprinklers-ka gurigaaga

## Alaamyada qiiqa wuxuu badbaadiyaa nolosha.

**Alaamkaaga qiiqa wuxuu u e'g yahay sidaan oo kale:**




## Sprinklers-ka aad bey muhiim u yihiin.

**Sprinklers-kaaga wuxuu u e'g yahay mid kuwaan oo kale ah:**







Waa qarsoon yihiin Nooca sprinkler-ka

### Alaamayada qiiqa

Gurigaagu wuxuu leeyahay alaamayada qiiqa kuwaas:

- keliya dhawaaq ka samee dhismaha dhexdiisa – maysan wicin dab-demiska
- waxaad u baahan tahay inaad tijaabiso bil kasta – hoos u riix batanka ee bartamaha alaamka qiiqa (loo yaqaan 'test and hush button') ilaa aad ka maqasho 'beep beep beep'
- waxaad u baahan tahay inaad si joogto iyo tartiib ah boorka uga jafto agagaarka kore
- hayso batariyada aadan u baahanayn inaad baddesho

**Wac Xarunta Wicidda  Gurisiinta taleefanka 13 11 72**
Haddii alaamka qiiqa uusan samaynayn 'beep beep beep' markii aad baarto

### Sprinklerada

Gurigaagu wuxuu leeyahay Sprinkle-ka kaasoo:

- deb-demiska ku digniin-geliya markii laga- shaqaysiiyo
- biyaha sii-daaya markii laga shaqaysiiyo
- ka-shaqaysii codka digniinta ee dhismaha ee dabaqaas.

Fadlan waxyaalo ha dulsaarin madaxyada sprinkler-ka.

**Ka wac Xarunta Wicidda Gurisiinta taleefanka 13 11 72**
Haddii sprinklerkaagu bilaabo inuu liigareeyo biyaha.

**tijaabi Alaamkaaga qiiqa Bil kasta**
Waa inaad maqashaa « beep, beep, beep »

# Macluumaadka kale ee muhiimka ah

**Ammaanka dabka ee dhsmahaaga waa masuuliyadda qof kasta.**

Haddii aad aragto qashin ama waxyaalo kale kuwaas oo hurin kara dab ama xanibi kara ka-baxsiga markii wax degdeg ah jiraan, **isla markiiba usoo-sheeg Xarinta Wicidda Gurisiinta 13 11 72.**

**Dhismahaagu wuxuu leeyahay qorshaha ka-baxsiga** – hubso adiga, iyo qoyskaaga iyo derisyadaadu inay garanayaan waxa qorshahaasi yahay iyo halka ay tahay barta kulanka.

## Maxaa la sameeyaa haddii dab dhaco

# Dab ayaa ka dhacaya gurigaaga



Hoos isku gaabi



Dadka kale u-dig



Albaabka xidh



Jaranjarooyinka hoose aad

## Haddii dab ka kaco gurigaaga

- Hoos isku-gaabi kana bax qiiqa
- Haddii aad ammaan tahay, dadka kale uga dig dabka
- Xidh albaabka qolka halka uu dabka ka imaanayo
- Xidh albaabka qolka ee gurigaaga markii aad tagto
- Aad halka laga baxo ee jaranjarada ee isteeriska hoose
- **Wac saddex eber (000)** waxaadna codsataa gurmadka dab-demiska

**Wac saddex eber haddii dab kaco**

**000**

### Haddii aadan baxsan karin

Haddii aadan ka bixi Karin dhismaha **wac saddex eber (000).**

Codso gurmadka dab-demiska una sheeg ayaga inaad caawimaad u baahan tahay



### Waxa la sameeyo haddii dab kaco

# Dab ka kacaya dhismaha

## Haddii dab ka kaco dhismaha

### Digniin geli

- nadaamka digniinta daganeyaasha si uu u sameeyo dhawaaq isku-xig xiga ee beeps oo loo yaqaan codka digniinta – taas oo macnaheedu tahay in gurmadka dabka La-wargeliyey.
- Haddii aad maqasho codka digniinta, ku jir gurigaaga hase ahaatee diyaar ahaw inaad baxsato.
- Haddii aad ku aragto qiiq ama dab gurigaaga **wac saddex eber (000)** markaasna codso gurmadka dab-damiska. Haddii aad ammaan tahay, sug oo u-sheeg xiriiriyaha waxaad arkayso.
- Markii gurmadka dab-damiska yimaadaan waxay heli doonaan halka uu dabku ka imaanayo.

### Ka-baxsiga dabka

- Haddii aad u baahan tahay inaad ka tagto dhismaha, codka digniinta wuxuu isku-baddelayaa codka ka-baxsiga oo qaylo-dheer oo xiriir ah – taas waa calaamad in meesha laga baxo ah, haddii ay ammaan tahay.
- Dab-demiyeyaashu waxay kaloo adeegsadaan nadaamka cinwaanka dadweynaha si ay u-sharxaan ka-baxsiga dabka.
- Adeegso jaranjarada oo raac isteeriska hoose ilaa barta kulanka ee dibadda dhismaha, halkaasna joog ilaa lagu sheego inay ammaan tahay in meesha laga tago.

### Ka-ilaalinta dabka dhismahaaga

Dhismahaagu wuxuu leeyahay:

- nadaamka digniinta ee daganeha (nadaamka cinwaanka dadweynaha)
- **sprinklers-ka ee guriga ku yaal iyo shuutaha qashinka laga tuuro**
- xiriir toos ah ee gurmadka dab-demiska haddii sprinklers-ku ay ka bilowdaan Gurigaaga ama qaybaha kale ee dhismaha.



Udiyaargarow inaad meesha ka tagto




wac saddex eber



Hoos u-raac jaranjarada oo



aada barta kulanka

# Ahow mid ka-ammaana dabka guriga dhexdiisa

**Haddii aad ku aragto dabka meel ka mid ah dhismahaaga, wac saddex eber (000) una sheeg xiriiriyaha in dab dhacayo. Sug ilaa uu xiriiriyuhu helo dhammaan faahfaahinta uu u baahan yahay (sida cinwaankaaga) kahor intaadan isaarin.**

## Shamacyada iyo gubayaasha saliidda

Haka tegin qolka markii uu shamaca ama gubaha saliidda uu daaran yahay.

Ha seexan markii shamacu ama gubaha saliiddu uu daaran yahay.



## Hiitarada

Ka ilaali dharka sida labiska iyo daahyada meel aad uga dheer hiitarada.

Dami dhammaan hiitarada kahor intaadan guriga ka tegin ama haddii aad seexanayso.



## Sigaarka

Sigaar haku cabbin sariirta dusheeda.

Sigaar haku cabbin balakoonkaaga.

Ku-qoy sigaarka la-isticmaalay xoogaa biyo ah kahor intaadan ku ridin biinka qashinka.

Ha-qashin tuurin.



## Karinta

Markasta joog qolkaaga intay cuntadu karsamayso.

Dami istoofka kahor intaadan ka tegin qolka.

Haka tegin ofanka oo daaran haddii aadan guriga joogayn.



### Alaamka beenta ah

Haddii alaamkaaga qiiqa uu bilaabo beepta markii aysan jirin wax degdeg ah (tusaale, haddii aad cuntada gubto), waxaad ku babi shukumaan ama xaashiyaha wargeyska hoosta alaamka qiiqa si uu ugu riixo hawada nadiifka ah alaamka qiiqa. Tani waxay joojinaysaa alaamka.

**Markii degdeg jiro wac saddex eber**

**000**

# Language Link –adeegyada turjumaanka

**English**

This publication is about housing. If you have difficulty reading English, you can get help with this publication. Please contact your local office or call Language Link on (03) 9280 0799 for an interpreter.

**Arabic** عربى

هذه النشرة هي عن الإسكان. إذا كان لديكم صعوبة في قراءة اللغة الإنكليزية، يمكنكم تلقي المساعدة لفهم هذه النشرة. رجاءً اتصلوا بالمكتب المحلي في منطقتكم أو اتصلوا برابط اللغة Language Link على الرقم (03) 9280 0790 لطلب مترجم شفهي.

**Simplified Chinese** 简体中文

这是一份关于住房的出版物。如果你英语阅读有困难，可以获得帮助。请联系本地办事处或拨打 (03) 9280 0791 联系 Language Link 要求口译员协助。

**Traditional Chinese** 繁體中文

本刊物有關住房資訊。假如您閱讀英語有困難，您可以尋求瞭解本刊物內容的幫助，請聯絡本地公房辦事處或撥打翻譯熱綫 (03) 9280 0789。

**Croatian** Hrvatski

Ova publikacija sadrži informacije o stambenom smještaju. Ako ovu brošuru ne razumijete zato što je pisana na engleskom, imate pravo na pomoć. Molimo vas, kontaktirajte svoj mjesni ured ili nazovite Language Link na broj (03) 9280 0792 i spojit će vas se sa tumačem.

**Polish** Polski

Niniejsza informacja dotyczy kwestii mieszkaniowych. Jeśli masz trudności z czytaniem po angielsku, możesz otrzymać pomoc w zrozumieniu tej publikacji. Prosimy zwrócić się do swojego lokalnego biura lub zadzwonić do Language Link pod numer (03) 9280 0793 i poprosić o ustnego tłumacza.

**Russian** Русский

Эта публикация касается жилищных вопросов. Если вам трудно прочитать ее по-английски, то вам может быть предоставлена помощь. Вы можете обратиться в свой местный жилищный отдел или связаться с переводчиком, позвонив на Языковую линию (Language Link) по номеру (03) 9280 0794.

**Somali** Somali

Daabacaadan waxay ku saabsan tahay gurisiinta. Haddii aad qabto dhibaato xaga aqriska Ingiriisiga, waxaad caawimaad ka helaysaa daabacaaan. Fadlan la xiriir xafiiska degaankaaga ama ka wac Language Link taleefanka (03) 9280 0795 wixii la xiriira turjumaanka.

**Spanish** Español

Esta publicación es sobre vivienda. Si tiene dificultad para leer inglés, se le puede ayudar con esta publicación. Por favor póngase en contacto con su oficina local o llame a Language Link en el (03) 9280 0796.

**Turkish** Türkçe

Bu yayın konutlar hakkındadır. İngilizce okumakta güçlük çekiyorsanız, bu yayınla ilgili yardım alabilirsiniz. Lütfen yerel ofisinizle ilişkiye geçin veya bir tercüman için (03) 9280 0797'den Dil Bağlantısı'nı arayın.

**Vietnamese** Việt

Ấn phẩm này nói về vấn đề nhà ở. Nếu quý vị gặp khó khăn đọc tiếng Anh, quý vị có thể được giúp đỡ để hiểu ấn phẩm này. Xin hãy liên lạc với văn phòng địa phương hoặc gọi cho Language Link theo số (03) 9280 0798 để có thông dịch giúp đỡ.

**Wixii luqooyinka kale ah, turjumaan ayaa laga heli karaa xafiiska gurisiinta ee deegaankaaga.**

**Waaxdas Adeegyada Dabka ee Wasaaradda ayaa si joogto ah dib-u-eegid iyo cusboonayn ku samaysa qorsheyaalka iyo tilmaamaha la xiriira ammaanka dabka.**

Si aad ugu hesho daabacaadan qaab la heli karo ka wac Xarunta Wicidda Gurisiinta 13 11 72, adigoo adeegsanaya Adeegga Isgaarsiinta Qaran taleefanka 13 36 77 haddii loo baahdo.

Waxaa idmay oo daabacay Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne. © State of Victoria, Wasaaradda Adeegyada Caafimaadka iyo Insaanka, Agoosto 2017 (1706013 High-rise). Lagana helo Website-ka Ammaanka Dabka ee Dadweynaha. bogga kireysteyaasha gurisiinta www.housing.vic.gov.au/fire-safety-public-housing-tenants